

**Jamhuuriyada Somaliland
Dawlada Hoose Hargeysa**



**Republic Of Somaliland
Municipality Of Hargeisa**

Xafiiska Aggasimaha Waaxda Dhulka

Ref/DH/AGDHDHH/_354/2024.

Date: 30/4/2024

KU: Maamulka Geosol
OG: Duqa Caasimda Jsl
OG: Xoghayaha dawlada hoose
OG: K/Xigeenka duqa caasimada

=Hargeysa=
=Hargeysa=
=Hargeysa=
=Hargeysa=

 **Ujeedo: Tirtirid Fayl**

Tixraaca warqada sumadeedu tahay **Go'aan Lr:350/2024**, Ujeedaduna ahayd **Cancel-garayn TR:21855** kuna qoranyahay muwaadinka magaciisu yahay **NACIIMA MAXAMED IIMAN** kana soo baxdey waraqada maxkamada **NO:MGH/XKS/CLQ/407/2022** ee **31/10/2022** kuna yaal dagmada I/K/Buur.

Hadaba sida uu soo cadeeyay gudoomiyaha dagamda I/K/Buur **MUSTAFE IBRAAHIM AADAN** in dhulkaasi si khaldan u dhacay oo lagu kala noqday sida ku cad nootayada tixraaceedu yahay **JPN/REF/NO:429/22** iyo qoraalka maxkamada **MGH/XKS/CL/407/2022** ee lacagta lagu kala cesheday.


Sidaas darteed warbixinta file-kani waa la tirtirayaa si file-ka muwaadinku u bilowdo.

Allaah madad leh


**Maxamed Yuusuf Cismaan
Aggasimaha Waxda Dhulka**

Email: MohamedYusuf@dhhgov.org Hargeysa

**Jamhuuriyada Somaliland
Dawladda Hoose Hargeysa
Xafiiska Duqa Caasimadda**



**Republic of Somaliland
Municipality of Hargeisa
Mayor's Office**

Go'aan Lr: 350/2024.

Date: 20th April 2024.

Go'aan Guddi Fulineed.

Shir ay isugu yimaadeen Guddida Fulinta Caasimada Hargeysa **20th April 2024**, Shir Guddoomiyena uu ka yahay Duqa Caasimada Hargeysa Mudane (**C/kariim Axmed Mooge**), kuna saabsanayd Tirtirid File, Dood & falan-qayn dheer ka dib:-

Guddida Fulintu-

Markay Arkeen

Sharciga Maamulka Gobolada & Degmooyinka JSL ee Xeer
No: 23/2019.

Markay Arkeen

Warqada Nootayada NO: JPN/REF/NO: 429/22 & Qoraalka
Maxkamada NO: MGH/XKS/CLQ/407/2022 ee 31st October
2022, lacagtana loogu celiyey Muwaadinadaasi sare ku
Xusan.

Markay Oggaadeen

In lagama-maarmaan ay tahay in la tirtiro File-ka TR NO:
21855 kuna qoran tahay Muwaadinad (Naciima Maxamed
Iimaan) maadaama laga noqday iibkeedii sida ku cad
Nootayada & Maxkamada ee sare ku xusan.

Markay Xaqiiqsadeen

Warqada No: DHH/DIK/546/2024 ee 15th April 2024,
Ujeedadeeduna ahayd Tirtirid File NO: 21855 kana soo
baxday Xafiiska Guddoomiyaha Degmada Kodbuur, Kaas oo
lagu tirtiriyey File-kaasi sare ku xusan ee File-ka TR No:
21855 ee ku qoran tahay muwaadinad (Naciima Maxamed
Iimaan) maadaama laga noqday iibkaasi sida ku cad
Notayada Sare ku xusan & Maxkamada.

Markay Tixgeliyeen

Tallada Masuuliyiinta ay hawshani khusayso.

Waxa ay Go'aansadey:-

Ka dib markii uu arkey dhamaan asbaabaha sare ku xusan waxa uu go'aansadey Guddida Fulinta In
gabi ahaanba la tirtiray File-ka ee TR No: 2185, kuna qoran tahay Muwaadinad (Naciima Maxamed
Iimaan) laguna tirtiray Notayada lagaga Noqday iibkaasi looguna celiyey lacagteeda (Eeg Notayada
No: JPN/REF/NO: 429/22 & Warqada Maxkamada No: MGH/XKS/CLQ/407/2022 ee 31st October
2022 & Warqada kale NO: DHH/DIK/546/2024 ee 15th April 2024).



(Siciid Nuur Jaamac)
Xoghayaha Fulinta D/Hoose ee Hargeysa.

Mahad

leh.

(C/kariim Axmed Mooge)
Duqa Caasimada Hargeysa, ahna Gudd/
Golaha Degaanka Caasimada Hargeysa.



Jamhuuriyadda Somaliland
Dawladda Hoose Hargeysa
Guddoomiyaha Deg. IK/Buur



Republic Of Somaliland
Municipality Of Hargeisa
Chairmen Of District IK/Bur

1 Braken Hala

TIX:- DHH/DIK/546/2024.
Date:- 15/04/2024.

Ku:- Duqa Caasimadda -JSL.
Og:- Xoghayaha Fulinta D/Hoose.
Og:- Ku-xigeenka Duqa Caasimadda

=Hargeisa=
=Hargeisa=
=Hargeisa=

UJ:- Cansel- Garayn Fayl TR/No:- (21855).

Mudane Maayor:-

Waxaanu halkan kuugu soo gudbinaynaa Faylka TR/No:- (21855) kuna qoran tahay (Naciima Maxamed iimaan) kana iibiyey Maxamed Ibraahim Siciid, Nootaayada tixraaceedu yahay ARPN/REF/No:- 2141/0042/2022, kuna taariikhaysan 09/Jan/2022.

Hadaba, Mudane Guddoomiye, iibka Dhulkaasi oo si khaldan u dhacay, oo lagu kala Noqday sida ku Cad Nootaayada Tixraaceedu yahay JPN/Ref//No:429/22, iyo Qoraalka Maxkamadda MGH/XKS/CLQ/407/2022, kuna taariikhaysan 31/10/2022, ee Lacagta loogu kala Celiyey.

Sidaasi darteed, Mudane Maayor, Faylka TR/No:- (21855) Waxaan Soo Jeedinayaa in Tirtiro, Maadaama oo lagu kala noqday Lahaanshihi Dhulka.

Allaa Mahad Leh

(Mustafe Ibraahim Aadan)
Guddoomiyaha Degmada IK/Buur

Hargeisa



Ku: Abdirahman
Waxaa loo qoray
loq gacsiyo fadhi
2014/2024



JIBRIIL PUBLIC NOTARY

4418429 / 063-3345747 / xaqsheeg2019@gmail.com Degmada Ik. buur gaar ahaan albaabka xarunta waaxda d/hoose

JPN/REF.NO: 435 /22
KU: CIDII AY KHUSAYSO

MAALINTA: KHAMIS
TIME: 10:18AM

DATE: 17 November 2022
HARGEYSA/ S/LAND

UJ: WAKAALAD BIXIN

Anigoo ah **NICIIMA MOHAMED IIMAAN**, PASSPORT NUMBER: **191175050715**, Waxaan Rabitaankayga Iyo Raali Ahaanshahayga Ku Cadaynayaa Kuna Sheegayaa in aan wakaalad buuxda u siiyay **FARXAAN XASAN CUMAR**, in isaga oo I matalaya uu awood buuxda u leedahay in labadayda mulkiyadood uu marka ay ka soo dhamaato **Dawlada Hoose Ee Hargeysa** in uu ii qaado labadayda **Tr No ee kala ah:-**
Tr No: 21855 iyo **Tr No: 18823**.

1. In uu ii qaadi karro labadayda mulkiyadood ee **Tr No** sare ku xusan yihiin.
2. In uu marka uu soo qaado **Tr No: 21855** uu ku wareegin doon **Ibraahim Aadan Faahiye**.
3. Sidoo kale marka uu soo qaado **Tr No: 18823** uu ku wareegin doono **Maxamed Baaruud Siciid**.
4. Mudada ay wakaaladani shaqaynaysana waa muddo furan.

Qoraalkana waxaan sidaasi ku saxeexay aniga oo miyir iyo maanba qaba xiskayguna dhan yahay oo aan khasbanayn.




MAGACA IYO SEXEEXA WAKAALAD BIXISADA
NICIIMA MOHAMED IIMAAN
CIWAANKA: +252 063-6993120
PASSPORT NO: 191175050715

Anigoo ah wakaalad qaataha hoos ku xusan waxaan halkan ku cadaynayaa in aan gudoomay wakaalad la i wakiishay, waxaana aan balanqaadayaa inaan ugu dhaqmi doono **si waafaqsan nidaamka la ii wakiishay**.
Qoraalkana waxaan sexeexay aniga oo miyir iyo maanba qaba xiskayguna dhan yahay.






MAGACA IYO SEXEEXA WAKAALAD QAATE
FARXAAN XASAN CUMAR
CIWAANKA: +252 063-4402274
ID CARD NO:



MARKHAATYADA GOOB JOOGA AH


1. AXMED MAWLIID MUUMIN +252 063-4053528
2. AWIL MAWLIID AHMED +252 063-3345747



Maamulka xafiiska nootaayada waxa uu cadaynayaa in uu qoraalkanai uu u dhacay sifo
Sharciga waafaqsan qoraalkana hortiisa lagu sexeexay

SARKAALKA XAFIISKA NOOTAAYADA

MR: MOWLIID AXMED JIBRIIL





JIBRIIL PUBLIC NOTARY

4418429 / 063-3345747 xaqsheeg2019@gmail.com Degmada Ik.buur gaar ahaan albaabka xarunta waaxda d/hoose

JPN/REF.NO: 430 /22
KU: CIDI AY KHUSAYSO

MAALINTA: KHAMIS
TIME: 11:19AM

DATE: 10 November 2022
HARGEYSA/S/LAND

UJ: CADAYN DHUL CABIRKIISU YAHYA 36X24M

Maanta oo ay bishu tahay **10 November 2022** waxa ay cadeyntani ku hor cadeeyaya xafiiska nootaayada cadeysada hoos ku xusan:-

CADEEYE: MAXAMED IBRAAHIM SICIID (UBAX)

CIWAANKA: +252 063-4828852

LOO CADEEYE: IBRAAHIM AADAN FAAHIYE

CIWAANKA: +252 063-4429461

QODOBKA 1^{AAD}

Anigoo ah **Maxamed Ibraahim Siciid (Ubox)** waxaan halkan ka sheegayaa kuna cadeynayaa in dhulkaa laygu wareejiyay ee ay iggu wareejisay **Niciima Maxamed** limaan sida ku cad warqada nootaayada **JIBRIIL NOTARY SUMAD NO: JPN//REF NO: 429/2022** kuna taarikhaysan **10 November 2022**, jagadaasi ku taala **Degmada Ib/Kood Buur** gaar ahaan **Xaafada Jig Jiga Yar** dhulkaas oo cabirkiisu yahay **36x24m** lehna **Tr NO: 21855** jihooyinkeeduna ay kala yihiin **Koonfur Iyo Galbeed Waddo Bari Iyo Waqooyi Dhisme.**

Hadaba waxaan halkan marlabaad ku cadeynaya in dhulkaasi (jagadaas) uu ku wareegay **Ibraahim Aadan Faahiye** laga bilaabo maanta oo ay bishu tahay **10 November 2022**. Sidoo kale dhulkan horre ayuu u iibsaa **Ibraahim Aadan Faahiye**

QODOBKA 2^{AAD}

Anigoo ah **Ibraahim Aadan Faahiye** waxaan halkan ka sheegayaa kuna cadeynayaa in aan ka gudoomay labadaa baloodh **36X24M** lehna **Tr No: 21855.**

MARKHAATYADA GOOB JOOGA AH

1. CABDIRAXMAAN IBRAAHIMN SICIID +252 063-4414431
2. FARXAAN XASAN CUMAR +252 063-4402274
3. CABDIFATAXAA IBRAAHIM AADAN +252 063-4280777
4. CALI C/RAXAAMN ISMAACIIL +252 063-4424657

XAFIISKA NOOTAAYADA

Maamulka xafiiska nootaayada waxa uu cadaynayaa in uu qoraalkanai uu u dhacay sifo

Sharciga waafaqsan qoraalkana hortiisa lagu sexeexay

SARKAALKA XAFIISKA NOOTAAYADA

MR: MOWLIID AXMED JIBRIIL
ALLAA MAHAD LEH





JIBRIIL PUBLIC NOTARY

3-4418429 / 063-3345747 ✉ xaqsheeg2019@gmail.com ☎ Degmada Ik.buur gaar ahaan albaabka xarunta waaxda d/hoose

JPN/REF.NO: 429 /22

MAALINTA: KHAMIIS

DATE: 10 November 2022

KU: CIDII AY KHUSAYSO

TIME: 10:54AM

HARGEYSA/S/LAND

UJ: CADAYN DHUL CABIRKIISU YAHYA 36X24M

Maanta oo ay bishu tahay **10 November 2022** waxa ay cadeyntani ku hor cadeeyaya xafiiska nootaayada cadeysada hoos ku xusan:-

CADEYSDO: NICIIMA MAXAMED IIMAAN

CIWAANKA: +252 063-6993120

LOO CADEEYE: MAXAMED IBRAAHIM SICIID (UBAX)

CIWAANKA: +252 063-4828852

QODOBKA 1^{AAD}


Anigoo ah Niciima Maxamed Iimaan waxaan halkan ka sheegaya kuna cadeynayaa dhulkii uu igga iibiyay Maxamed Ibraahim Siciid (Ubox) sida ku cad warqada nootaayada Al-Raxma Notary Sumad No: ARPN/REF NO: 2141/2022 kuna taarikhaysan 9 January 2022, jagadaasi oo cabirkeedu ahaa **36X24M** lehna **Tr No: 21855** jihooyinkeeduna ay kala yihiin Koonfur iyo Galbeed Waddo Bari iyo Waqooyi Dhisme, dhulkaas oo uu igga siiyay lacag dhan **\$15,000 (SHAN IYO TOBAN KUN OO DOLLAR)**.

Hadaba dhulkaas faahfaahintiisu sare ku xusan tahay laga bilaabo maanta oo ay bishu tahay **10 November 2022** waa uu igga wareegay labada baloodh **36X24M** maadama uu ii celiyay Maxamed Ibraahim Siciid (Ubox) lacagtii dhulkaa aan siistay hadda oo dhanayd ee uumarayo **\$19,000 (SAGAAL IYO TOBAN KUN OO DOLLAR)**, maadama oo aanu ku kala qaadnay lacagtaas Maxkamada Gobalka Maroodi Jeex ee **SUMAD NO: MGH/XKS/CLO/407/2022** kuna taarikhaysan **31 October 2022**.

Sidaa darteed waxaan xafiiska Dawlada Hoose Ee Hargeysa iyo xafiiska GIS-ka iyo cidkasta oo shaqo ku leh aan u cadeynayaa in uu igga wareegay **Tr No: 21855** kuna wareegay (Maxamed Ibraahim Siciid (Ubox).

QODOBKA 2^{AAD}

Anigoo ah Maxamed Ibraahim Siciid Ubox waxaan halkan ka sheegayaa kuna cadeynayaa in aan raali ka ahay heshiiskan lacagtaa oo dhan **\$19,000 (SAGAAL IYO TOBAN KUN OO DOLLAR)** dhamaan waan wada siiyay sida warqada Maxkamada Gobalka Maroodi Jeex ku xusan.



FG: Maxamed Ibraahim Siciid (Ubox) waxa uu maanta siiyay lacag dhan **\$1,000 (Kun Dollar)** oo ay dhamaan wada qaadatay oo ah lacagtii kaga baxday file-ka.

MARKHAATYADA GOOB JOOGA AH


1. CABDIRAXMAAN IBRAAHIMN SICIID +252 063-4414431
2. FARXAAN XASAN CUMAR +252 063-4402274
3. CABDIFATAXAA IBRAAHIM AADAN +252 063-4280777
4. CALI C/RAXAAMN ISMAACIIL +252 063-4424657

XAFIISKA NOOTAAYADA


Maamulka xafiiska nootaayada waxa uu cadaynayaa in uu qoraalkanai uu u dhacay sifo Sharciga waafaqsan qoraalkana hortiisa lagu sexexay

SARKAALKA XAFIISKA NOOTAAYADA

MR: MOWLIID AXMED JIBRIIL
ALLAA MAHAD LEH



JAMHUURIYADDA SOMALILAND



REPUBLIC OF SOMALILAND

MAXKAMADDA GOBOLKA M-JEEX / REGIONAL COURT M-JEEX.

XAFIISKA KAALIYAHA-SARE

MGH/XKS/CLQ/407/2022

Taar:- 31/10/2022

Ujeedo:-Caddayn Qaasho Lacag Dhan \$13,500 Dollar

(Saddex Iyo Toban Kun Iyo Shan Boqol Oo Dollor)

Maxkamada Gobolka M/Jeex Hargeysa:-

Waxay Cadaynaysaa Inay Ku Wareejiisay Lacagtaasi
Faahfaanteedu Hoos Ku Xusan Tahay:-

Lagu Wareejiyay:-**Niciima Max'ed Iimaan**

Hore U Dhigay:- **C/Raxmaan Ibraahim Siciid**

Cadadka Lacagta:- **\$13,500 Dollar**

(Saddex Iyo Toban Kun Iyo Shan Boqol Oo Dollor)

Garsooraha Dacawada Haya:- Xasan Mataan

Sidaasi Darteed Waxay Marlabaad Maxkamaddu
Cadaysaysaa Inay Ku Wareejiisay Lacagtaa Sare Ku
Xusan Manta Oo Ay Taariikhadu Tahay **30/10/2022.**

Waan Qaatay Lacagtaasi:-

Niciima Max'ed Iimaan



(Samsam Maxamed Jaamac)


Kaaliyaha Sare Ee Maxkamada Gobolka M/Jeex.
=Hargaysa=



Maxkamada Gobolka Hargeysa: Head Office Address Near independency park Tel. (4464658/4098085)

.Mgh@Gmail,& Outlook.com Facebook Page. MAXKAMADA GOBOLKA HARGEYSA.

JAMHUURIYADDA SOMALILAND



REPUBLIC OF SOMALILAND

MAXKAMADDA GOBOLKA M-JEEX / REGIONAL COURT M-JEEX.

XAFIISKA KAALIYAHHA-SARE

MGH/XKS/CLQ/437/2022

Taar:- 07/11/2022

Ujeedo:- Caddayn Qaasho Lacag Dhan

\$5,500 Dollar(shan Kun Iyo Shan Boqol Oo Dollor)

Maxkamada Gobolka M/Jeex Hargeysa:-

Waxay Cadaynaysaa Inay Ku Wareejiisay Lacagtaasi
Faahfaanteedu Hoos Ku Xusan Tahay:-

Lagu Wareejiyay:- Niciima Maxamed Iimaan

Hore U Dhigay:-C/Raxmaan Ibraahim Siciid

Cadadka Lacagta:- \$5,500 Dollar

(shan Kun Iyo Shan Boqol Oo Dollor)

Garsooraha Dacawada Haya:- Xasan Mataan

Sidaasi Darteed Waxay Marlabaad Maxkamaddu
Cadaysaysaa Inay Ku Wareejiisay Lacagtaa Sare Ku Xusan
Manta Oo Ay Taariikhadu Tahay 08/11/2022.

Vaan Qaatay Lacagtaasi:-

Niciima Maxamed Iimaan

(SAMSAM MAXAMED JAAMAC)

liiyaha Sare Ee Maxakamada Gobolka M/Jeex.



Maxkamada Gobolka Hargeysa: Head Office Address Near independency park Tel. (4464658/4098085)

.Mgh@Gmail,& Outlook.com Facebook Page. MAXKAMADA GOBOLKA HARGEYSA.